SAAMI AL CAAMIRI

# CAALAMAANIYADDA
## "DAACUUNKA CASRIGA"
### SIXIDDA ERAY BIXINTA IYO DAAHFURKA UJEEDKA

SOO KOOBID :
SH SHARMAARKE BUKHAARI

# HORMADA 1AAD

**SAAMI AL-CAAMIRI**

# CAALAMAANIYADDA

## DAACUUNKA CASRIGA

**SOO KOOBID**

**SHARMAARKE MAXAMED CIISE**

**BUKHAARI**

# Hordhac

Caalamaaniyaddu waxa ay u taagan caqiido baaxad weyn leh oo saameyn kuleh nolosha cusub ee casrigan haday tahay dhan dhaqaale, dhaqan , qaab fikir iyo dhinac siyaasadeedba taas oo keenaysa in dooddeedu noqoto mid marba soo cusboonaata oo aan afka laga dhigin mid u heellan iyo mid kasoo horjeedaba.

Hadalhaynta badani waxa ay keenaysaa in marba boodhka laga tumo ka hadalka caalamaaniyadda yada oo la daahfurayo ujeedka erayga lana toosinayo eraybixinta kadibna la tilmaamayo waxa ay keeni karto ee ka dhalanaya iyo halka ay ku danbayn karto.

Waxa uu yidhi Shaykh Al Islaam Ibnu Taymiyah *"**Qofka aan garan sababaha keena mabaadi'ida haba ahaadaan qaar khaldan mabaadi'idaasiye uma suuro gal aha in uu daweeyo ama ka warceliyo shubuhaadkooda**"* ([1]) manhajkaas ayuu raacayaa Dr Saami Caamiri oo ah aqoon yahan tuunisi ah oo ku takhasusay cilmiga is barbardhiga diimaha marka uu miisaanka saarayo dhiganihiisan

" العالمانية طاعون العصر, كشف المصطلح وفضح الدلالة "

Ee uu soo saaray xarunta Takween sannadii 2017kii oo ka kooban 337 bog.

Waxa la is weydiin karaa miyaan hore wax looga qorin mawduuca calmaaniyadda maxaa uu buuggani kaga duwan yahay buugaagtii hore mawduucan qaadaa dhigtay?

Waxa uu buuggan kaga duwan yahay buugaagta kale sida qoraagu uga duwan qorayaasha hore wax uga qoray mawduucan waxana ka mid ah waxyaalaha quruxda usamaynaya buuggan arimahan soo socda:-

1- Waxa uu qoraagu aqoon durugsan u leeyahay luuqadaha cusub ee Arabic, English iyo French ka, waxa sidaas oo kale uu aqoon u leeyahay luqadihii

[1] - الإستغاثة 182/1

qadiimka ahaa sida Hebrew, Syriac, iyo luqadii Greek ga cusub waxa taasi ka muuqataa buugaagta uu u laabtay qoraagu isaga oo 109 buug oo ka mid ah 221 ka buug ee uu ulaabtay, aqoontaas durugsan ee uu u leeyahay luuqaduhu waxa ay ka muuqataa natiijooyinka cilmi baadhistan ka soo baxday waxa aynnu ka xusi karnaa in qoraagu eraygii caanka ahaa ee calmaaniyad ku bedalay erayga "**Caalamaaniyad**" sida inoo iman doonta.

2- Waxa qoraagu uu ku laabtay buugaagtii asalka ahayd arintaas oo uu kaga duwan yahay qorayaasha carbeed ee wax ka qoray mawduucan calmaaniyadda.

3- Waxa uu qoraagu si qoto dheer u dulsaaray eray bixinta caalamaaniyada iyo daahfurka ujeedkeeda xukunka sharciga ah isaga oo si faahfaahsan u sharaxaya qaabka ay isaga hor imanayaan labada shahaado ee islaamnimada lagusoo galo iyo ujeedka caalamaqaniyadu.

4- Waxa qoraagu daraasad dhamaystiran kusamayeeyay saameynta dhaqaale ee caalamaaniyadda dunida carabta iyo caalamkaba waxana qoraaga ka caawisay daraasad in uu kasoo jeedo dalka Tuunis oo kamid ah dalalka dunida carabta ugu horaysay ee ay kusoo duusho caalamaaniyadu saamayn badanna ay ku yeelatay.

6- Waxa qoraagu uu ka saxaya akhristayaasha buuggiisan eraybixino khaldan oo la xidhiidha mawduuca calmaaniyadda eraybixinadaas oo ka dhashay dacaayadda iyo borobagaandhada tusaale ahaan: in caalamaaniyada lagu eray bixiyo in ay tahay cilmaaniyad oo laga soo dheegtay cilmi ama aqoon, ama in caalamaaniyaddu ku timi natiijo ka dhalatay dagaalkii kiniisadu ku haysay aqoonta maadiga ah sida sayniska (Sceince) iyo dacaayadaha la midka ah.

7- Waxa qoraagu si qotodheer u faahfaahiyay sababaha keenay fashilka ku yimaad dhaqdhaqaaqa islaamiga ah isaga oo buuggan raaciyey tobanka gef ee ay ku dhaceen dhaqdhaqaaqyada islaamiga ah wxa ka mid ahaa waxyaalaha uu xusay:-

- In eray sheega diimeed lagu soo koobo keli ah wacdi ka madhan caqiido.
- In meesha laga saaro qaadashada sunayaasha nolosha oo keli ah lagu koobsado talo saarka Allaah iyo khayr filasho qudha ama in taa liddigeed lagu koobsado sunayaasha dunida yada oo meesha laga saarayo talo saarashadii Allaah.
- In lagu mashquulo wasaa'il oo la hilmaamo ujeedooyinkii waawetynaa ee camalka islaamiga laga lahaa.
- In lagu mashquulo waxka sheega dhaqdhaqaaqyo kale iyo mashaariic islaaxi ah oo la buunbuuniyo khilaadfka ka dhaxayn kara labo mashruuc iyo ka badan.
- In lagu dhex lumo Musxafka Quraanka iyo jaraa'idka yada oo midkood looga dhigayo kan kale lid. Waxa aad kala dooranaysaa in aad la socoto caalamka iyo wararka siyaasadeed oo aad jaraa'idka si maalinle ah u akhrido iyo in aad isha ka laaabato siyaasadda oo dhan oo ku koobsato keli ah akhriska Quraanka Kariimka halka meesha laga saarayo in qofku cibaadadana ku dedaalo waaqica iyo xaaladda uu ku nool ysahayna la socdo.

Waxa uu qoraagu u soo gudbiyay cidkasta oo ku hawlan wanaajinta camalka islaamiga ah iyo kor u qaadista dacwadda talooyin wax ku ool ah oo haddii sidooda loo shaqo galiyo lagu gaadhayo midho dhal wanaagsan.

Waxa buuggu ka kooban yahay afar cutub oo waaweyn afartaa cutub oo kala ah:-

Cutubka koowaad: **Xaqiiqada fikradeed ee Caalamaaniyada**.

Cutubka labaad: **Xaqiiqada waaqiciga ah ee Caalamaaniyada**.

Cutubka sadexaad: **Xaqiiqada sharciga ah ee Caalamaaniyada**.

Iyo cutub guud oo gebogabo u noqonaya buugga kuna sumadaysan:

Qaabka borobagaandho ee loo suuqgeeyo Caalamaaniyada.

# CUTUBKA KOOWAAD

## Xaqiiqada aragtiyeed ee caalamaaniyada

Waxa qoraagu gelayaa dedaal dheer oo uu kaga gungaadhayo eraybixinta Caalamaaniyada isaga oo raacaya manhaj naqdineed uu ku kala xulayo saxnaanshaha iyo sugnaan shaha eraybixinada soo maray caalamaaniyada iyo halka ay ka timi.

Waxa uu qoraagu dul istaagaya erayga laatiiniga ah ee "**SECULARISM**" waxa uu qoraagu tilmaamat in qoraagii reer England ee **George Holick** uu ahaa qofkii ugu horeeyay ee isticmaala eraygan "**Secularism**" waxana macno ahaan uu u isticmaalay: Ka sooca maamul diimeed nolosha. Asalka erayguna waxa uu ka laatiini ku noqonayo Saeculum oo la macno ahaa العالم ama "World" ama " Time" ama "Age" oo u dhignayd nolosha adduun oo kasoo horjeeday ama ku beegnayd Allaah malakuutkiisa.

Waxa erayga ku yimi is bedel muuqda kadib markii loo isticmaalay rag diimeed yadii kiniisadaha joogay ama "رجال الدين" hadana waxa ku yimi isbedel kale oo waxa loo isticmalay nidaamka maaliyadeed ee laga wareejiyay kiniisadaha laguna wareejiyay dhinaca siyaasadda iyo maamulka madaniga ah.

Waxa adag in erayga "**Secular**" la fahmo yada oo aan laga dhinbiil qaadanayn deegaan kiristaan taas oo keenaysa in eray bixinta iyo taariikhdiisa laga saaro oo la kala duwo.

Waxa qoraagu ku laabtay weydiinta ah eraygu ma waxa uu kasoo dhanbalmay عِلم Mise عَالم?

Isaga oo qoraagu ka war qaba in erayga asalka ahi yahay mid aan ahayn carabi lagana soo qaaday qaamuusyada kiristaanka ayaa waxa kale oo uu iftiimayay:

In saameyn uu ku leeyahay qaamuusyada kiristaanka gaar ahaan kiniisada suryaaniga ah oo ku taalay badhtamaha dunida muslimka ah labada luuqadood ee suryaaniga iyo carabigu waxa ay yihiin isku bah marka la joogo luuqadaha oo labadooduba waxa ay ka mid yihiin carrabka Saamiga ah, waxana masuul ka ah soo gelinta eraygan luqada carabiga ah carabtii kiristaanka ahayd sida uu sheegayo mustashriqii **Bernard Lewis**.

Waxa kale oo la yaableh in asalka eraygu ka yimi eraybixin diineed iyo kutubta diinta kiristaanka hasayeeshee sida uu ku nuuxnuuxsanayo Carl Schmidt "***Dhamaan muuqaalada dawladda cusub waa aragtiyo diimeedyo la calmaaniyeeyay***" Qaamuuskii ugu horeeyay ee isticmaala earybixintani waa qaamuuska Egypt Elias Diameter oo ka mid ahaa kiristaankii carabta.

Marba haddii erayga "علم"aanu ku lahayn asalka qaamuusyada waxa uu qoraagu dooranayaa erayga "عالمانية" oo koobsanaya saddex waaxoodka kala ah: Kownka, waqtiga, casriga waxa kale oo qoraagu naqdinayaa earay bixinadsa kala ah "دنيوية"ama"دهرية"oo uu qaatay faylasuufka reer marroco ee Daaha Cabdiraxmaan.

Waxa uu qoraagu u gudbayaa in uu ka niqaasho arin udub dhexaad u noqotay ka hadalka calmaaniayada oo ah in calmaaniyadu ku timi dagaal dhex maray kiniisada iyo saynisyahanadii qarniyadii madoobaa isaga oo qoraagu qaab cilmiyaysan oo ku salaysan Sociology ku tibaaxaya in calmaaniyadu aanay ahayn marnaba midho ku yimi dagaal dhex maray kiniisada iyo saynisyahanadii dunida reer galbeed.

Magacyadii ugu caansanaa saynisyahanadii reer galbeedku bilowgii calmaaniyada dhamaantood waxa ay ahaayeen kirisan sida: "**Descartes**, **Kepler**, **Galileo**, **Newton**" buun buuninta doodda odhanaysa calmaaniyadu waxa ay ku timi dagaal dhex maray saynis iyo kiniisaddu waa borobagaandho lagu qurxinayo calmaaniyada ee ma aha xaqiiqo.

Waxa uu si isku miid ah u nqadinayaa qoraagu **Safar Al-Xawaali** oo ku tagay in calmaaniyadu ku timi isku dhaca sayniska iyo kaniisada iyo **Dr. Casiis Cadamah** oo isna meesha ka saaray iska hor imaanshaha **Darwinism** ka iyo kiristaanka!!

Waxa uu si muuqata u leeyahay **Saami Al Caamiri** ma jirto cilaaqo isku liddi ah oo ka dhaxaysa calmaaniyadda iyo sayniska laakiin waxa jira aragti ku lammaan caalamaaniyada oo ah in aqoonta iyo garashada guud ahaan lagu soo koobo dariiqa sayniska (**Sceince**) ka aragtidaas oo afka qalaad lagu yidhaahdo (**Sceintism**).

Waxa qoraagu uu intaa uga gudbayaa in uu soo bandhigo taariikhda feker ee ay leedahay caalamaaniyadu isaga oo xiliyada iyo heerarka caalamaaniyadu ay soo martay is dultaagay kana bixiyay qayexaad ku filan.

Waxa uu qoraagu u qaybiyay heerarka iyo noocyada ay caalamaaniyadu soo martay intan soo socota:-

- Caalamaaniyad diineed: oo u dhiganta in nin-diimeedka (رجل الدين) laga saaro dadka kale isaga oo ku lammaan diinta muqadaska ah.
- Caalamaaniyad qaanun/hantiyeed: oo dhiganta in xoolihii badnaa ee ay maamulaysay kiniisadu lagu wareejiyo mkaamul madani ah ama aan diini ahayn.
- Caalamaaniyad ilbaxnimo: oo u dhiganta in diinta laga saaro gebo ahaan nolosha ama si aan dhamaystirnayn nolosha looga saarin diinta.

Waxa kale oo ay caalamaaniyadu soo martay taariikh dheer oo iftiimanaysa heeararkii ay soo martay mawqifka ay caalmaaniyadu ka qaadanaytso diinrta kuwaas oo qoraagu ka tilmaamay intan soo socota:-

- Caalamaaniyada aan ogolayn diin oo ah caalamaniyada u aragta diinta mid burinaysa caalamaaniyada waxana caalamaaniyadan u ah hoggaan **Charles Brandlafe**.
- Caalamaaniyada lebraaliga oo ah caalamaaniyada ogol jiritaanka diinta una samaynaysa xad kanasoo horjeedda maamulka diineed iyo in diini marjic u noqoto dawladda.
- Caalamaaniyada isku dhafan oo ah caalamaaniyada aan xumaan iyo samaan midna ku darsanayn diinta una aragta in qofka ay ku koobnaato oo aanay mujtamaca kale usoo gudbin.

Waxa kale oo uu qoraagu si qoto dheer uga waramay xidhiidhka ka dhexeeyay kiniisada iyo dawladda iyo heerarka uu soo maray marka la dul istaago taariikhda fikir ee calmaaniyada gaar ahaan midda yurub isaga oo qoraagu u dhigay sidatan:-

- Tusalaha fanasiiska oo ah in guud ahaan lakala sooco diinta iyo dawladda waxa tusalahan si huriyay shuuciyadii aan ogolayn wax la xidhiidha diin ee mabda'a ka dhigatay Ilxaadka yada oo dabaqaysa xagjirnimadi Maarkis.
- Tusaalaha jarmalka oo ah in ay kiniisadu noqoto mu'asaso ama xarun ka qayb qaadata waxtarka iyo dhismaha bulshada kuna jooga abaabulka cibaado ama waxbarasho iyo ka qabyqqadashada danta guud.
- Tusaalaha ingiriiska oo ah in la isku badhxo kiniisada iyo dawladda yada oo la is ogolaysiinayo nidaamka dawladda iyo kiniisada ama lagu xusayo dastuurka diiinta rasmiga ah ee dawladda iyo giriiga oo kale.

Waxa qoraagu intaa uga gudbay in la is dultaago qaybaha ay leedahay caalamaaniyadu isaga oo xusay fikradda uu cabqarigi **Cabdul Wahaab Al Masiiri** tilmaamay ee ah in loo qaybiyo caalamaaniyada labo qaybood oo kala:-

- Caalamaaniyad guud: oo ah aragti dhamaystiran oo xadaynaysa xidhiidhka ka dhexeeya nolosha iyo diinta kuna koobaysa ogaalka midka lagu gaadho dareemaha akhlaaqdana lagu tilmaamo midda nafciga leh ama cid kale waxtarta halka aadamaha loo qayaxayo qaab mutuxqan.
- Caalamaaniyad gaar ah: oo ah in diinta iyo maamulka ama dawladda laakala ilaaliyo yada oo aan inkirayn ama qayaxaad ka bixinayn akhlaaqda, ogaalka iyo aadamaha midna.

Waxa uu qoraagu aad u amaanayaa qaybinta **Cabdul Wahaab AL Masiiri** isaga oo aan ku raacsanyan soo dhaweynta uu Masiiri soo dhawaysatay caalamaaniyada mideeda gaarka ah!!

Intaa marka uu qoraagu ka gudbo waza uu tilmaamayaa shan qodob oo ah sawiro khaldan oo lagu qayaxo caalamaaniyada taas oo aad ugu fidsan dunida carabta:-

- In lakala xusho waaxyihii caaalamaaniyada yada oo mid ka mid ah waaxyaha caalmaaniyada lagu qayaxo in ay tahay keligeed caalamaaniyad.
- In si taban (salbi ah) loo qayaxo caalmaaniyada yada aan loo tixgelinayn sidii fikrad iskeed u taagan ama leh fikrad udub dhexaad u ah.
- In aan la hufin qayaxaada caalmaniyadu ka bixinayso diinta yada oo ay kala duwan yihiin labada diimood ee kiristanka iyo islaamku.
- In caalamaaniyada lagu koobo caalamaaniyada shuuciga ah oo keli ah.
- In lagu celceliyo dacaayada iyo borobagaandhada lagu faafiyo fikirka caalamaaniga ah sida in ay xorayso caqliga iyo maanka taas oo aan ka turjumayn marnaba natiijo hubanti ah oo ay leedahay caalamaaniyadu ee ah keliya Make Up loo marinayo fikirka caalmaaniga si ay ugu dagmi karaan dad badan.

Kadib marka uu qoraagu khaladaadkaas kasoo gudbay waxa uu keenay oo ku xejjiyay warcelin uu akhristuhu filayay oo ah warcelinta ka lagaga jawaabayo weydiinta ah waa maxay qayaxaada qumman ee ay leedahay caalamaaniyadu?

Waxa uu qoraagu ku qayaxay caalamaaniyada in ay tahay;-

***"Mabda'a ku taagan inkirida marjiciyada diineed ama maamulka diineed ee la xidhiidha arimaha bulshada yada oo marjiciyada loo noqonayo laga dhigayo aadamaha si loo gaadho xaqiiqada iyo manfacada ku jirta adduunkan"***

Waxa uu qoraagu raaciyay qayaxida caalamaaniyada mabaadi'da guud ee ay leedahay caalamaaniyadu isaga oo tilmaamay:-

- Xaqiiqada dunida oo mutuxan waa mid ku filan badhaadhaha aadamaha sidaa darteed waa in loo noolaadaa keli ah manfaca aduunyaad.

- Waa in meesha ay ka baxdaa maamul ama xukun muqadas ah oo ka sareeya garaadka iyo garashada aadamaha taas oo lagu tilmaamo weedha ah ***"ka furfurka sixirka dunidan ku tigitgan"***
- Qaanuunka akhlaaqeed ama dhaqan waa wixii nafci ah ama maadi ah isaga ayaana asal u ah jiritaanka aadamha.
- Caqliga aadamuhu waa wadada keli ah ee lagu gaadhi karo xaqiiqada la munaafacaad san karo waan tilmaamta ugu cadcad ee ay isku dhejiyaan caalamaaniyiintu.
- Wanaag la gaadhayaa ma jiro saynis la'aantii sida uu ku nuuxnuuxsado **Holick** oo kale.

# Cutubka labaad

# Xaqiiqada waaqiciga ah ee caalamaniyada

Waxa uu halkan qoraagu fursad siinayaa **Dr Cabdul Wahaab Al Masiiri** oo in badan dhiganayaashiisa kaga waram cawaaqib xumada ay dunida ku reebtay caalamaaniyadu iyo sida ay u higaasisay dhaqankii guud ee aadamaha casrigan nool waxa uu si muuqata uga warbixinayaa furfurka ay ku keentay aadamaha ama xaaladda ay culimada cilmiga bulshadu ku magacaabaan "**Dehumanization**".

Oo ka dhigan in aadamuhu ka baxo xaaladdii ahayd qiimaynta aadaminimo ee adduunka yada oo halbeeg laga dhigayo macaanka waxana gabbood looga dhigayaa xorriyadda kadibna aadumuhu waxa uu noqonayaa mid aan lahayn ama gacan ku hayn jiheeye rasmi ah oo ahaga noloshiiisa.

Waxa uu aadamuhu noqday markaa mid addoon u ah raasamaalka, qiiqa warshadaha iyo dukaamaysiga.

Waxa muuqata in adhaahdii Niitsha "**Nietzsche**" ee ahayd ogaysiis ku bixinta geerida Ilaaha waxa ka dhalatay in caalamku dhamaantii geeri galo waayo waxa meesha ka baxay waxkasa oo macno u samaynayay noloshan adduunka waxana uu noqday mid ku salaysan xisaab mutuxan oo wadan wax xikmad ah.

Waxa dunidan ay caalamaaniyadu gayaysiisay in ay ku qotonaato labo lugood oo hawada sare ka laalaada sida uu ku cabiray faylasuufkii ustareeliyaanka ahaa ee Peter Singer.

Waxa caalamaaniyadu akhlaaqda aadamaha ku xidhay saddexdan arimood mid ka mid ah uun oo midba kan kale kasii daran yahay:

1- Nafciyah: oo ah in halbeega akhlaaqdu ay noqoto manfacada ama dheefta ku jirta oo qudha!!
2- Caaqibiyah: oo ah in akhlaaqda xukun looga dhigo waxa ay ku dhamaanayso natiijadeedu.
3- Anaaniyah: oo ah in ahlaaqda looga dhigo halbeeg dan shakhsiga ah ee ku jirta.

Ma jiro halbeeg guud oo akhlaaqeed oo caalamaaniyadu ay damaanad qaadayso se, waxa dunida galbeed ka shaqeeya waa awood boolis oo ka

badbaadisay in dunida reer galbeed noqoto kayn lagu kala xoog roon yahay oo kale sida uu tilmaamayo faylasuufkii ruushka ahaa ee **Diotovsky** markii uu lahaa **"*Haddii Ilaah dhintay shay kastaa waa caadi*"** taas oo uu ka cabirayay in haddii uu meesha ka baxo awooddii ka saraysay dhamaan aadamuhu aanay jirayn wax dhaqan suuban ah oo ay ka midaysan yihiin aadamuhu waxana sii faahdfaahinaya faylasuufkii faransiiska ahaa ee **Emile Durkheim** markii uu lahaa "Darwinism ku waxa ay noqotay qanuun shacbiyeed abqaalaya kala xoogroonaanta bulshooyinka iyo isu libaaxaynat" waana halkii uu **Sh Maxmuud Shaakir** lahaa "Waxa uu isu bedelay nidaamkii caalamku mid ka mutuxan ruuxdii hagaagsanayd waxana caqlaaniyaddii sarraysay bedeshay nidaam ganacsi oo dhibku ah bini aadamnimada, iyada oo ay u siman yihiin kan la cunayo iyo ka wax cunayaa"

Waxa caalamaaniyadda mutuxan ka dhashay in la baabi'iyo haweenka yada oo la adeegsanayo dallada Fenimism ka iyada oo la meel marinayo mashruuca Gender ka taas biyo shubku noqonayo in la aado dhanka Uni-sex ga.

Waxa la buunbuuniyay qeyixidii ahayd "Dheddigu waa lab ceebaysan" ee uu lahaa wadaad kiristankii Toma Ekwini halka Fenimism ku ay maanta ku dooddayaan in la bedelo erayga ah WOMEN oo laga dhigo WOMYN si meesha looga saaro erayga MEN ee kelmadda WOMEN ugu danbaysa!! Waa burburinta xidhiidhkii rasmiga ahaa ee adaamaha ka dhexeeyay bilowgiisii illaa maanta taas oo ay caddayn u tahay weedhii caan baxday todobaataneeyadii ee ahayd "**Haddii Fenimism ku yahay aragtida waxa dhaqangelintu noqonaysaa Lespianism ka**"!!

Waxa kale oo caalamaaniyadu ay galaafatay aqoontii yada oo guud ahaanba meesha laga saaray Xaqiiqadii oo lagu bedelay Nisbiyo oo ah in aanay jirin xaqiiqo la isku wada waafaqsan yahay ee qofwalba waxa uu aaminsan yahay ay tahay xaqiiqada rasmiga ah ee uu haysto.

Waxa cilmi baadhis lagu sameeyay mujtamaca Maraykan "***Waxa 72% dadku ay yidhaahdeen: ma jirto wax xaqiiqo la dhaho oo ka dhaxaysa aadamaha***"([2])

Nisbiyada iyo saddexdeeda dhardhaar ee **Nietzsche**, **Markx** iyo **Freud** ayaa maanta falsafadda ka calanwallaysa dunida reer galbeed falsafaddaas oo ku badhxan Jabriyo kaa teedaysa gaadista xaqiiqada.

Intaa kuma aanay istaagin waxyaalada caalamaaniyaddu e waxa kale oo ay galaafatay qiimihii iyo xaqiiqadii quruxda iyo deegaanka waxana caan ah maanta waxa loogu yeedho **"The Ecological Crisis"** taas oo ka dhalatay raadinta macaanka iyo raaxada hadafka u ah aadamaha maanta kadib markii la gubay keymihii oo loo bedelay kuraas iyo sariiro qaali ah dhirtiina la shiday oo loo bedelay waraaqo iyo wax la mid ah dunida oo dhanna lagu furay qiiq iyo sun aan xaddi iyo tiro midna lahayn oo kasoo neefaya warshadaha waaweyn ee u adeegaya aadamaha raaxo raadiska ah, waxa guud ahaanba dabar go'ay xayawaanadii badda iyo berriga qaar ka mid ah oo ka qayb ahaa isu dheelitirka nolosha adduunka ugu danbayn waxa bilaabantay tijaabada Nuclear ka oo halistiisu maanta ka dhigi karto adduunka aan kor saaranahay mid lama degaan ah oo laga guurayo.

## Sidee caalamaaniyaddu ku gashay dunida carbeed

Waxa qoraagu ku bilaabay cinwaan hoosaadkan sixidda borobagaandhada ah in la isku ladho caalamaaniyadda iyo caalimkii reer andalus ee Ibn Rushd iyo dhaxalkiisi aqooneed, waxa in badan oo dunida carbeed caalamaaniyadda looga dhigay mid ku qotonta dhaxalkii Ibn Rushd iyo fikir carbeed oo aan ahayn soo galooti, waxana xusid mudan in shareecada iyo sida uu u qayaxay **Ibn Rushd** iyo sida ay u qeyaxday caalamaaniyaddu waa laba arrin oo aad u kala fog.

Xaqiiqada qadhaadh ayaa ah in caalamaaniyaddu tahay mid ku timi ciidankii iyo awooddii **Napoleon** uu lasoo galay Egypt dhamaadkii qarnigii 18aad isaga oo dhex galay qaanuunkii iyo maxkamadihii Egypt.

[2] - Cilmi baadhistaa waxa samaysay: "**GROUP RESEARCH BARNA**"

Waxa layaab ah in kiristankii carbeed ay ahaayeen kuwii ugu badnaa ee ku baaqayay caalamaaniyadda dunida carbeed waxana ugu dhiirranaa **Protestant** oo si badheedh ah u durkinayay shareecada sida: **Shibli Shamil**, **Farah Anton**, **Georgy Zeidan** iyo **Salama Musa** taas oo kulmisay borobagaandhada carabtii kiristanka ahaa iyo awooddii **Napoleon**!!

Marna ma ay ahayn caalamaaniyaddu mid ku salaysan baahiyaha dunida carabta waxa ay ahayd keli ah muraayad ay soo muuqato fikirka dunida reer galbeedka taas oo ka dhalatay gudhidda maskaxdii curineed ee carabtu iyada oo lasoo carabiyeeyay waxa marag ah in dunida carbeed lagu lug gooyay **Communism** ka kadib xataa markii ay dhacday iyo **feminism** ka walow aanu ahayn waxaas oo dhan markii lagu hungoobay waxa la abqaalay xidhiidh aan diin ahayn oo bulshada lagu kulmiyo sida **Nationalism** , **Arabism** iyo wax la mid ah yada oo laga soo bilaabay jimciyado sir ah sida ururkii Jaamacadda Beirut oo kale.

Waxa kadib intaas bilaabmay in la qurxiyo gumeysigii France ee Egypt waxana soo baxay akaademiyiin si aan kala hadh lahayn u qaatay fikirkii reer galbeedka sida **Taha Hussein** oo ku tilmaamay duulaankii **Napoleon** ee Egypt uu ahaa mid barakaysan intaas kadib waxa danbi noqotay in lagu baaqo in dib loo anba qaado isku dhaqa shareecada islaamka oo meesha laga saaro caalamaaniyadda yada oo wadamada carbeed qaarkood ay gaadhsiiyeen dil qoor kajar ah in lagula kaco ciddii ku baaqda in dib loo sii anboqaado isku dhaqa shareecada islaamka.

Waxa qoraagu uga sii gudbay intaas in uu tusaale ka bixiyo waxa uu caalamka carabtyu ka dheefeen caalamaaniyadda sanka laga galiyay waxana uu tusaale usoo qaatay dalka tuunis oo uu kasoo jeedo labadii xilli ee **Buurqiiba** iyo **Bin Cali**!!

## Sawraca ([3]) / الهوية

Waxa gebi ahaanba dadka reer tuunis lagala dagaalamay in ay ku abtirsadaan taariikhdii dheerayd ee muslimiinta yada meesha laga saaray qaanuunkii islaamka, xeerkii qoyska iyo xittaa awqaaftii!!

## Dhaqaalaha

Waxa lagu culaysiyay dalkan yar daymo farabadan waxana la qanuun gareeyay heshiisyo maqaar-saar ah oo loogu xalaalaynayo hantida dalka iyo macdantiisa dunida reer galbeed gaar ahaan France ka!!

## Wacyiga guud

Wacyiga guud ee saxaafadda iyo goloyaasha u adeegaya nidaamka caalamaaniga ah ee tuunis waxa uu kusoo uruuray in lagu baaqo in ay dadku is qaawiyaan yada oo lagu andacoonayo in ay tahay xorriyad.

## Waxbarashada

Waxa guud ahaanba gudhay xarumihii waxbarasho illaa qiimaynaha qaarkood oo lagu sameeyay waxbarashada kuliyadaha kala duwan ee afrika sannadii 2013kii ay jaamacadaha tuunis qaarkood ka hoosmareen kuwa Somalia oo dhowr iyo labaatan sano dagaal sokeeye ku jirtay!!

## Dumarka

Waxa soo gaadhay tuunis buuqii xoraynta dumarka illaa heer ugu sarraysay ee furriin dunida carabta ay  gaadhay tuunis dunida oo dhanna kaalinta afraad ka gashay, dumraka guumaaba ee guurka seega waxa ay gaadheen 60% waxana kor u kacay dumarka mukhadaraadka cuna!!

---

[3] - Ku aaddinta erayga sawrac erayga carabiga ah ee الهوية waxa ku ijirta dood waxana ka mid ah dadka ka biyo diiday Dr Cabdulqani Muxammad Xuseen (Beder) sida uu ku tilmaamay muxaadaradiisa duuban ee "Afka, Aqoonsiga iyo Diinta" ka baadh Youtube ka.

# Cutubka saddexaad

# Xaqiiqada sharciga ah ee caalamaaniyadda

Waxa cutubkani ka mid yahay waxyaalaha buuggani uu kaga duwan yahay buugaagta kale ee laga qoray caalamaaniyadda waxana uu qoraagu ku caddaynayaa xaqiiqada caalamaaniyadu ay ku qotonto eek a hor imanaysa ama meesha ka saaraysa shareecadii islaaamka. Waxa kale oo cutubkani meesha ka saarayaa doodaha jaban eek u andacoonaya in diintu tahay keli ah mid khuseysa qofka ama aan shaqo ku lahayn maamulka, ama kasoo qaadaysa diinta mid khuseysay waqti iyo taariikh laga soo gudbay.

Ujeedka ugu weyn ee aynnu u qayaxnay ama ufaahfaahinay caalamaaniyadu waa in aynnu xukunka sharciga ah ee diintu dul dhigtay fikirkan maanta aadka loola dhacsan yahay ee badalka looga dhigayo shareecada islaamka waayo waxa qaacida sharciga ahi ay tahay sida ay fuqahaduba ku tilmaamaan kutubtooda "***Shayga xukunkiisu waxa uu farac ka yahay sawirka aad ka haysato***" ([4]).

Waxa qoraagu cutubkan kusoo bandhigayaa xidhiidhka ka dhexeeya erayga udub dhexaadka u ah diinta ee kelmadda tawxiidka iyo caalamaaniyadda. Waxa kale oo uu cutubkani faahfaahinayaa sida shareecadu u sharraxday kelmadda tawxiidka ee"**لا إلـــــه إلا الـلــــه**" oo ah furaha jannada iyo udub dhexaadka iimaanka iyo islaamnimada.

Waxa khalad ah in kelmad loo fasiro si khladan taas oo gebi ahaanba qeyixitaankii diinta bedeli kala sida in lagu fasiro in macnaha **لا إلـــــه إلا الـلــــه** ay tahay **لا خالق إلا الله** taas oo ka dhigan in tawxiidka lagu koobo in Allaah loo keliyeelo maamulkiisa iyo rabbinimadiisa uun haddii sidaas lagu fasirona waxa muslimiin noqon lahaa gaaladdii qureysheed ee Nebigu N.N.K.H ka beri noqday shirkigoodana lagula dagaalamay waayo gaalada qureysheed waa ay aaminsanaayeen in Allaah yahay kan asagu dadka arsaaqa ama maamulka adduun iska leh u fiirso hadal Allaah yidhi:

قَالَ تَعَالَى: ﴿وَلَئِن سَأَلْتَهُم مَّنْ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ وَسَخَّرَ الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ لَيَقُولُنَّ اللَّهُ ۖ فَأَنَّىٰ يُؤْفَكُونَ ﴿٦١﴾﴾ العنكبوت: ٦١

Nebi Allow haddii aad weydiiso cidda abuurtay samada iyo arlada

maamushana qoraxda iyo dayaxa waxa ay ku odhan Allaah..

[4] - ku laabo qaamuusyada eraybixinta fiqhiga ah sida kan majmacul fiqhiga kuweyt oo kale.

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَلَئِن سَأَلْتَهُم مَّن نَّزَّلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَحْيَا بِهِ ٱلْأَرْضَ مِنۢ بَعْدِ مَوْتِهَا لَيَقُولُنَّ ٱللَّهُ ۚ قُلِ
ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٦٣﴾﴾ العنكبوت: ٦٣

Nebi Allow haddii aad weydiiso cidda roobka shubta ee dhulka ku noolaysa abaar dabadeed waxa ay ku odhan Allaah..

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿وَلَئِن سَأَلْتَهُم مَّنْ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ لَيَقُولُنَّ ٱللَّهُ ۚ قُلْ أَفَرَءَيْتُم مَّا تَدْعُونَ مِن دُونِ
ٱللَّهِ إِنْ أَرَادَنِىَ ٱللَّهُ بِضُرٍّ هَلْ هُنَّ كَٰشِفَٰتُ ضُرِّهِۦٓ أَوْ أَرَادَنِى بِرَحْمَةٍ هَلْ هُنَّ مُمْسِكَٰتُ
رَحْمَتِهِۦ ۚ قُلْ حَسْبِىَ ٱللَّهُ ۖ عَلَيْهِ يَتَوَكَّلُ ٱلْمُتَوَكِّلُونَ ﴿٣٨﴾﴾ الزمر: ٣٨

Nebi Allow haddii aad weydiiso cidda abuurtay samada iyo arlada waxa ay ku odhan Allaah.

Aayaddahan iyo kuwa la mid ah waxa ay tilmaamayaan macne waadix ah oo ah in keliyaynta Allaah ay ka dhalanayso in lagu kufriyo waxkasta oo kasoo hadhay sida aayaddo kaleba ay tilmaamayaan waxa uu Allaah yidhi:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿لَآ إِكْرَاهَ فِى ٱلدِّينِ ۖ قَد تَّبَيَّنَ ٱلرُّشْدُ مِنَ ٱلْغَىِّ ۚ فَمَن يَكْفُرْ بِٱلطَّٰغُوتِ وَيُؤْمِنۢ بِٱللَّهِ فَقَدِ
ٱسْتَمْسَكَ بِٱلْعُرْوَةِ ٱلْوُثْقَىٰ لَا ٱنفِصَامَ لَهَا ۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٥٦﴾﴾ البقرة: ٢٥٦

..Ruuxii ka gaalooba daaquurka ee Allaah rumeeya waxa uu qabsaday xadhig adag oo aan ka go'ayn..

Waxa aayadda iyo kuwa la midka ah ka cad shareecaduna si cad u tilmaamtay in rumeynta Allaah iyo weheshiga kufrigu aanu meel wada geli-karin sida darteedna ay waajib tahay in ruuxu ku kufriyo wixii Allaah kasoo hadhay oo dhan oo shareecadu ku tilmaamtay magaca DAAQUUT sida aayaddaba ka muuqata.

Waxa Al-Imaam Ibnu Qayim tilmaamayaa in Daaquutku saddex yahay:

1: Daaquutul xukmi/ mid Allaah sokadii xukun laga raadiyo.

2: Daaquutul cibaadah/ mid Allaah sokadii la caabudo.

3: Daaquutul mutaabacah/ mid Allaah sokadii la raaco.

Sidaa darteed caalamaaniyadu waxa ay ka mid dawaaqiidaa shareecadu ay tilmaamtay waxana ay soo galaysaa Daaquutul xukmi maadaama oo ay tahay wax Allaah sokadii loo xukun tagayo oo xaqii Allaah xukumay meesha laga saarayo.

قَالَ تَعَالَى: ﴿أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ ءَامَنُوا۟ بِمَآ أُنزِلَ إِلَيْكَ وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَن
يَتَحَاكَمُوٓا۟ إِلَى ٱلطَّٰغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوٓا۟ أَن يَكْفُرُوا۟ بِهِۦ وَيُرِيدُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَن يُضِلَّهُمْ ضَلَٰلًۢا بَعِيدًا ﴿٦٠﴾﴾
النساء: ٦٠

Waxa uu leeyahay Sheykhul Islaam Ibnu Taymiyah:
"***Waxa Allaah tilmaamay kuwii sheeganayay in ay rumeeyeen kutubtii hore iyo kan Nebiga N.N.K.H lagu soo dejiyay hadana ka tagaya in ay isku xukumaan wixii Allaah soo rogay una jeesanaya isku xukunka waxa ay dejiyeen dawaaqiit la buunbuuniyay sida ka dhacda kuwa islaamnimada sheeganaya ee hadana ka xukun dhiganaya hadalada gaalada, falaasifada, iyo kuwa la midka ama siyaasadda qaar ka mid ah boqorada taas oo ka baxsan shareecada Islaamka sida boqorada Tattaar oo kale***"

Intaa kadib waxa uu qoraagu soo bandhigayaa saddexda waaxood ee tawxiidka iyo sida ay u burinayaan caalamaaniayadda waxa uu ugu horeysiiyay waaxda koowaad ee tawxiidka oo ah:

1: **Tawxiidka rubuubiyada**: waxa uu keensanayaa tawxiidkani in Allaah loo keli yeelo abuurka oo Allaah cid aan ahayn oo wax abuurtaa ma jirto sida oo kale amarka Allaah baa iska leh amarkaas oo laba qaybood ah amar dunyawi ah oo ah maamulka kawnka ee fulaya sida Allaah tilmaamay:

قَالَ تَعَالَى: ﴿أَلَا لَهُ ٱلْخَلْقُ وَٱلْأَمْرُ تَبَارَكَ ٱللَّهُ رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٥٤﴾﴾ الأعراف: ٥٤

Midka kalena waa amarka allaah ee sharciga ah ee allaah aadamaha ku addoon saday sida Allaah tilmaamayo:

قَالَ تَعَالَى: ﴿وَجَعَلْنَا مِنْهُمْ أَئِمَّةً يَهْدُونَ بِأَمْرِنَا لَمَّا صَبَرُوا۟ ﴿٢٤﴾﴾ السجدة: ٢٤

Waxana inoo muuqata sida caalamaaniyaddu meesha uga saartay in uu taliyo oo jiro amarka allaah ee sharciga ah guud ahaanna ay u laalayso in la fuliyo wixii allaah aadamaha amray iyada oo ku bedelaya dawaaqiid allaah sokadii la buunbuuniyay.

2: **Tawxiidka cibaadada:** waa in Allaah loo keli yeelo wax kasta oo qofku qabanayo oo cibaado ah qasdiga iyo ujeedkana laga dhigto raaligelinta Allaah waana shaqadii rasmiga ahayd ee rusuha Allaah usoo diray in badanna Quraanka Kariimka waxa lagu caddeeyay ahmiyadda tawxiidka cibaadada iyo in meesha laga saaro waxa allaah sokadii la caabudayo waxa uu Allaah yidhi:

قَالَ تَعَالَى: ﴿قُلۡ إِنِّيٓ أُمِرۡتُ أَنۡ أَعۡبُدَ ٱللَّهَ مُخۡلِصٗا لَّهُ ٱلدِّينَ ١١﴾ الزمر: ١١

قَالَ تَعَالَى: ﴿قُلِ ٱللَّهَ أَعۡبُدُ مُخۡلِصٗا لَّهُۥ دِينِي ١٤﴾ الزمر: ١٤

Waxa xusid mudan in udub dhexaadka adduunka uu Islaamku ku tilmaamay raalligelinta Allaah halka caalamaaniyaddu ay ku tilmaamtay udub dhexaadka adduunku in uu yahay aadamaha waana laba arrin oo aad u kala fog.

3: **Tawxiidka tilmaamaha iyo magacyada Allaah:** waxa tawxiidkani uu ku qotomaa in Allaah lagu sifeeyo waxa uu naftiisa ku sifeeyo ama Suubanuhu N.N.K.H uu ku sifeeyo yada oo aan sifooyinkaa Allaah la qaabaynayn kuwa aadamahana aan loo ekaysiinayn.

Hadaba waxa caalamanaaiyaddu ku haystaa Allaah magaciisii ahaa **الحكم** iyada oo sifadaas siinaysa aadamaha kana qaadaysa Allahii xaqa u lahaa taasi waa bushin ay caalamaaniyadu bushinayso tawxiidkii tilmaamaha Allaah.

Waxa hadaba halkaa inooga muuqata in caalamaaniyadu ka hortimi tawxiidkii allaah dhamaantii aynna meesha ka saartay sarrayntii sharciga Allaah halka ay sharciga daaquutka koryeeshay kuna baaqayso in aadamaha la raali geliyo halkii Allaah la raalli gelin lahaa.

Waxa qoraagu intaa kadib u gudbay in uu tiirarkii iimaanka u bandhigo xaqiiqada caalamaaniyada waxa uu tilmaamay in iimaanku yahay xaqiiqo isku duuban oo leh qaybo ama gobolo kala duwan oo loo yaqaan shucabul iimaan se' ay shucabkaasi leeyihiin saddex waaxood oo waaweyn oo ay ku kala aroorayaan saddexdaa waaxood oo kala ah:

1- Asalka iimaanka / oo seeska haddii la waayo qofkaas iimaankiisu aanu qummanaaanayn.
2- Waajibka iimaanka/ iimaanka waajibka ahi haddii uu meesha ka baxao waxa uu qofku ku mutaysanayaa cuquubo aakhiro wax badan oo fadliga ahlul iimaanka ahna wuu seegayaa.
3- Mustaxabbul iimaan/ oo ah derajo qofku haddii uu seego uu gefayo ama seegayo darajooyinkii sarsare ee iimaanka.

Waxa hadaba caalamaaniyadu ay burinaysaa asalka u horeeya ee iimaanka waxana ay degaysaa qalbiga oo ah meeshii uu degi lahaa iimaanku waayo asalka iimaanu oo ah rumeyn iyo hogaansanka uu qofku rumeynayo ee u hogaansamayo waxyiga iyo sharciga Alle waxa bedelaya u hogaansanka caalamaaniyada iyo laalista sharciga Alle.

Waxa kale oo caalamaaniyadu ay burinaysaa halbeega laba qaybood ee kale iimaanka oo ah cidda amarka laga qaadanayo ee la adeecayo I n ay tahay Allaah ee aanay ahayn aadame ama daquuqyo kale, waxana camalka samafalka ah iyo cibaadooyinka ay ku qayaxaysaa caalamaaniyaddu doorasho shakhsi ah.

Waxa kale oo qoraagu soo bandhigayaa sida caalmaaniyadu u burinayso tiirka labaad ee shahaadada oo ah محمد رسول الله qaabka ay uga hor imanayso waxa ay tahay mar haddii ay tahay shahaadadani in la adeeco oo loo hogaansamo waxa uu Nebigu N.N.K.H inoola yimi rumeyn dabadeed waxa ay caalamaaniyaddu laashay macnahaas iyada oo wax tixgelin ah aan siinayn waxa Nebiga N.N.K.H xagiisa inooga yimi wax ka amarqaadasho ahna aan loogu laabanayn.

## Caalamaaniyaddu waa diin

Intaa kadib waxa uu qoraagu u gudbayaa in uu caddeeyo in caalamaaniyadu ay tahay diin gaarkeeda u taagan waxana uu taas ka horaysiiyay hordhacyo muhiim ah oo uu asal uga dhigayo cinwaan hoosaadkan ahmiyaddiisa leh.

- Kelmadda Diin waa eray ay midaysan yihiin afafka Cibriga, Aaramiga, Suryaaniga, Ashuuriga, Xabashiga iyo Carabigu waxana ay maadada eraygu kamidaysan tahay in lagu fasiro ama diin ku tilmaaman tahay u hogaansan isu dullayn iyo dariiq nololeed.
- Waxa aqoon yahankii reer Masar iyo caalimkii Dr Muxammad Cabdallah Diraas tilmaamay in macnaha qaamuuseed ee erayga diin uu kulansanayo saddex macne oo kala ah:
    1- Hanti iyo ku tagrifal
    2- Uhogaansan iyo adeecid
    3- Caqiidayn iyo rumeyn

  Waxana uu Caalimkii Abul Aclaa Al Mawduudi ku daray macne afraad oo ah: Abaalmarin iyo la xisaabtan.

Diin marka eraygaasi uu ku yimaado Quraanka Kariimka ah waxa lagu tilmaamaa midda xaqa ah iyo tan baadilka ah labadaba waxa uu Allaah yidhi: قَالَ تَعَالَى: ﴿لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ ﴿٦﴾ الكافرون: ٦ Islaamku waa diinka xaqa ah wixii kasoo hadhayna waa baadil.

- Waxa jira khalkhal badan oo eraybixinta diin lagu qayaxo sida in lagu koobo oo qudha ku aaddin erayga latiiniga ah ee **Religion** oo ka timi **Relego** oo la macne ah ku celcelinta akhriska ama **Religare** oo la macne ah cusboonaysiinta ballanka ama ka timi **Legere-res** oo la macne ah jirrida ama seeska.

Qeyixitaanka erayga waa mid madmadow badani ku teedsan yahay marka lajoogo dunida reer galbeed. Waxa ay u raacaan saddex waddo si ay u qeyexaan erayga diin:

1- In sawraca diin si gaar ah loo sharraxo.
2- In si mawduuci ah iyada oo lagu qayaxo diinta xidhiidhka ka dhexeeya diimaha oo ah jiritaanka Ilaah iyo waxyaalaha qaybiyaadka ah.
3- In shaqada diinta lagu qayaxo oo la dhaho diintu waa waxa qabta shaqada noocaas iyo noocaas ah.

Hasayeeshee qaamuuska diimaha ee caanka ahi waxa uu diinta ku qeyaxayaa in ay tahay "***Nidaaminta nolosha iyada oo udub dhexaad looga dhigayo macnayaal xeeldheer oo kala duwan dhanka shakliga ah, dhanka dhamaystiranka, dhanka caddaanta, kuna dhisan dhaqanka ku xeerran***"

Ugu danbayn waxa qoraagu uu qeyixitaanka caalamaaniyadda u bandhigayaa diinteena islaamka iyo sida ay u sheegtay diimaha baadilka, qaamuusyada ibistimoolajiga ah iyo sida ay diimaha u qayaxeen, qanuunka iyo sida uu diimaha u qayaxay iyo sifooyinka ay leedahay caalamaaniyaddu ee caddaynaya in ay tahay caalamaaniyaddu diin dhamaystiran oo la mid ah diimaha baadilka ah:

Waa diin sharci: waayo waa qaanuun aragti guud oo maaddi ah kuna dhisan manfaco ku salaynaya adduunka.
Waa diin qaamuus ahaan: sida uu tilmaamayo **Miriam Webster** qaamuuskiisa falsafadeed ee PHILOSOPHY OF DICTIONARY in diimuhu laba qaybood yihiin **Supernaturalism** oo ah diimo dabiici ah iyo **Ideals Humanistic** oo diimo dadku alifteen waxana uu caalamaaniyadda ku darayaa qaybta labaad ee diimaha aadamuhu dejisteen.
Waa diin sida ay tilmaamayaan kuwa aaminsani: waxa uu tilmaamayaa caalimkii cilmiga bulshada ku caan ka ahaa qarnigii 19aad ee **August Kant** in caalamaaniyaddu tahay diintii aadaminimada **IHUMANITE DE RELIGION LA** ([5]) sidaas oo kale waxa ku magacaabay diin **Ernest Renan**, **Ropert J**, **John Sellar**, **John Deway** iyo **Paul Kurtz** oo dhamaantood ka mid ah madaxya weyntii caalamaaniyiinta.
Waa diin kiristaanka agtooda: sida uu wadaad injiileedka maraykan ee **Hegue** uu ku seegay kutubtiisa waxa uu ku tiriyay mid ka mid ah diimaha. Waxa kale oo ku raacay **Cox** oo isna ku tilmaamay caalamaaniyada in ay tahay diin.
Waa diin qaanuun ahaan: sannaddii 1961 kii waxa maxkamadda maraykan ku tilmaamtay caalamaa niyadda in ay diin ka mid ah diimaha farakurimiska ah ee aadamuhu farsamaystay waxa kale oo go'aankaas lasii adkeeyay sanadihii 1963 iyo 1965 tii taas oo sharci ahaan maraykan caalmaaanioyadda ku dartay mid ka mid ah diimaha aadamuhu curiyay.

[5] - Waa af faransiis ha u akhrin English ahaan.

Waxa diinta caalamaaniyaddu ku sifowday arimo ay kala wadaagto diimo kale oo liuita ama caqiidooyinka intoodii ugu liidatay ayaa lagu kulmiyay caalamaaniyadda waxana aka mid ah sifooyinka ay leedahay caalamaaniyadu kuwan:

1- Waa diin Ilxaadi ah. In badan waxa caan noqotay in ilxaadka ay shareecadu sheegtay lagu koobo ilxaadkan cusub ee dafirsan jiritaanka Ilaah oo dhan iyada oo taasi ilxaad tahay hadana shareecadu waxa kale oo eray ay u isticmaashay in laga leexdo wadiiqadii toosnayd sida in sifooyinka Allaah la leexiyo oo kale waxa uu Allaah yidhi:

﴿وَلِلَّهِ ٱلۡأَسۡمَآءُ ٱلۡحُسۡنَىٰ فَٱدۡعُوهُ بِهَاۖ وَذَرُواْ ٱلَّذِينَ يُلۡحِدُونَ فِيٓ أَسۡمَٰٓئِهِۦۚ سَيُجۡزَوۡنَ مَا كَانُواْ يَعۡمَلُونَ ١٨٠﴾

الأعراف: ١٨٠

Waxa uu leeyahay Al-Imam Ibnu Qayim "***Ilxaadka magacyada Allaah iyo sifooyinkiisa lagula imanayaa waa in laga leexiyo macnihii ay lahaayeen iyo waxii ay ku fadhiyeen ee laga qaadanayay***" waxa aynnu hore usoo aragnay in caalamaaniyadu isku sifaysay qaar ka mid ah magacyadii Allaah sida aynnu horeba usoo aragnay.

2- Waa diin shirki ah. Waxa caalamaaniyadu ay wadaajisay Allaah iyo adoomihiisa xaqa sharciyaynta iyo amarka taasina waa shirkigii Quraanka Kariimka ah lagu xusay waxa uu Allaah yidhi:

﴿أَمۡ لَهُمۡ شُرَكَٰٓؤُاْ شَرَعُواْ لَهُم مِّنَ ٱلدِّينِ مَا لَمۡ يَأۡذَنۢ بِهِ ٱللَّهُۚ وَلَوۡلَا كَلِمَةُ ٱلۡفَصۡلِ لَقُضِيَ بَيۡنَهُمۡۗ وَإِنَّ ٱلظَّٰلِمِينَ لَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٞ ٢١﴾ الشورى: ٢١

Waxa aynnu hore usoo xusnay in caalamaaniyadu ay sharci dejinta ku wadaajisay Allaah aadmaha oo ay xalaalaynta iyo xaaraantinimaynta ay cid aan Allaah ahayn u tiirisay.

Hadaba labadaa sifo ayay shareecada islaamku ku sifaysay caalamaaniyada iyada oo u tixgelisay in caalamaaniyadu tahay diin ka mid ah diimaha baadida ah ee aadamuhu bacarimiyey.

# Cutubka Afraad
# Qaabka borobagaandho ee loo suuqgeeyo Caalamaaniyada

Caalamaaniyiinta dunida saddexaad gaar ahaan caalamaaniyiinta carbeed eraygan calmaaniyad waxa ay isku dayeen in ay qurxiyaan qaabab kala duwan ayayna ugu dhaashiyeen waxna ka mid ah qaababka ay u suuqgeeyeen caalamaaniyadda:-

- **Dhinaca afeed:** eray bixinta waxa gundhig u ah qaabka loo fasiro iyo sida loo xadeeayo hadaba caalamaaniyiinta carbeed saddex qaab ayay uga faaiideysteen oo kala duwan dhinaca afka oo kala ah:
    1. In la tahmiishiyo erayga oo dhan lagana soo qaado wax aan qiim sidaa ah ku fadhiyin waana wadada uu qaaday **Fu'aad Sakariyaa** taasina waa wado khaldan waxa aan cidna ka qarsoonayn eray bixinta iyo saameynta uu ku leeyahay sawirka guud ee aad fikradda ka qaadanayso.
    2. In la isku tolo oo sanka la isu geliyo calmaaniyada iyo sayniska waana wadada uu qaaday **Najiib Maxfuud** isaga oo isku dayaya in uu islaameeyo eraygan isagan oo ku fasiray in caalmaaniyadu tahay in dhulka la galo oo khayraadkiisa laga faaiideysto fasirkaas oo aad uga fog macnaha saxda iyo quxda ah ee ay leedahay caalamaaniyadu.
    3. In laga firdhado magaca calmaaniyad oo lagu bedelo magacyo kale oo dadku qaadan karo sida "Dimuqraadiyad" "Caqlaaniyad"iyada oo dadka loo muujinayo in aan islaamka weerar lagu ahaynm waxana ugu caansan calmaaniyiinta carbeed ee isticmaala ereyadaa **Muxammad Caabid Al Jaabiri**.
- **Dhinac falsafadeed:** waxa calamaaniyiintu ay aad ugu dedaalaan in ay ka reebaan calmaaniyadda raadkeeda iyo waxa ay koobsanayso mana jiro calmaani carbeed oo si muuqata kuugu wada sharaxaya caalamaaniyada waxase uu kuugu sawirayaa sidii in ay tahay barnaamij xisbi sharaxni uu olole ku gelayo oo kale isaga kuu sawiraya in horumarku yahay caalamaaniyada tusaalena usoo qaadanaya wadamo horumaray sida America oo kale halka uu iska indho tirayo in Angola oo kaleba ay tahay dawlad calmaaniyad ah calmaaniyada iyo horumarkuna aanu isku xidhnayn.

Waxa calmaaniyiinta carbeed badanaa ku celceliyaan in markasta oo horumar iyo xoriyad la helo ay wiiqanto diintu oo aanay heshiis noqon karin horumarka iyo ku dhaqanka diintu yaga oo ku celcelinayay hadaladii **Max Weber** waxase taasi burtay marki korukac ku dhaqan diineed ahi yimi xiliyadan postmodernism ka ama ilbaxnimo dabeed ah tusaale waxa amakaag ku noqotay dunida reer galbeed sida ay u faaftay sheeko faneedkii **Da Vinci Code** eek u saabsan Al-Masiix iyo filimka laga sameeyay oo labadooduba aad u faafay. Waxa ay tilmaamayaan in afar arimood ay ku tusayaan in aanay suuro gal ahayn in baraaruga diimeed la wiiqo waxa ay yihiin afar arimood ee ay marag gashadaan:

1. Kacdoonkii Iiraan.
2. Xulufadii kaataliga ee Poland ee kasoo horjeeday midowgii soofiyeedka.
3. Soo noqoshada protestant ka maraykan oo dib usoo laabtay mar kale.
4. Mar kale oo kaatoligii dib uga bilaabmay laatiin America.

Iskaba dhaafo waxa ay daraasaadka qaarkood tilmaamayaan in aadamaha diin ku toosanaha ah lagu magacaabo الواعي ama Religious Homo ama Sapines Homo.

- **Suuqgeynta natiijo dhalanteed ah:** waxa calmaaniyiinta carbeed ku dhacaan saddex qalad marka ay inoo xayeysiinayaan calmaaniyada iyo sida ay inoo gaadhsiinayso badhaadhe adduun waxana ay kala yihiin:
    1. Ma carabaabaan gunta calmaaniyada iyo dhuuxeeda.
    2. Waxa ay sheegtaan calmaaniyada iyo afkaar kale oo ku lammaan waxii ka dhashay.
    3. Isku xidhka calmaaniyada iyo waxa ay sababtay oo dood badan ay ka furan tahay yaga oo calmaaniyada xuna ka carara calmaaniyada mabda'a kale ku lammaan yahay ee horumar lagu gaadhona sheeganaya.

Tusaale ahaan marka **Holick** leeyahay "***Calmaaniyadu waxa ay damaanad qaaday xaqa kala aragti duwanaanshaha iyo aragtida xorta ah***" waxa beeninaya taariikhdii madoobayd ee ay ka tagtay calmaaniyadii shuuciga ahayd ee midowgii soofiyeedka!!

**Waxa hadaba ay weydiintu tahay ma leedahay calmaaniyadu khayr?**

Warcelin: waxa shareecada islaamku sheegtay in aanu adduunka jirin shay ka madhan khayr iyo wanaag waxa marag madoon ah in calmaaniyadu ay meesha ka saartay amar ku taaglayntii kiniisada iyo khuraafaadkii diimeed ee wadaada kiristaanku ku banaysan jireen xoolada dadka iyo dhiigooda waxase ay calmaaniyadu isku qaaday dhamaan diimihi iyada oo xeer ka dhigatay la dhaqankii bilowga ahaa ee diinta la bedelay ee baadilka ah ee kiristaanku uu taariikhda soo mariyey ugu danbayn **calmaaniyadu waxa ay ka carartay diin wahmi ah iyada oo u leexatay dhanka nisbi nimada aqoonta iyo caqiidada waxana ay taagan tahay**

**Kud ka guur oo qanjo u guur waa kiilkastaba seeg.**

## Caalamaaniyaddu waxa uu damaanad ka yahay in aanu soo noqon xukunkii Theocratic

Waxa in badan oo ka mid ah kuwa suuqgeynta u sameeya caalamaaniyaddu ay isku xidhaan xukunka **Theocratic** ah iyo xukunka islaamka iyaga taas uga jeeda in caalamaaniyadu xal ka tahay xukunka awooda ku uruurinaya hal jiho ama laba. Waana dacaayad raqiis ah waayo farqi laxaadleh ayaa u dhexeeya xukunka **Theocratic** ga ah iyo ka islaamku qayaxay**.**

**Islaamku waxa** uu diiday ilaahay wadaadada iyo in muqadas xumo iyo gef ka saliim ah in laga dhigo xaakimka umad u taliya waxa kale oo shareecadu ay tilmaamtay in umaddu xaq u leedahay in ay doorato cidda xukumaysa waxa uu yidhi **Cumar Ibnu Khadaab:** "***Qofka la baayactama nin aan muslimiinta kale la baayac tamin oo laga shuurayn ma aha in lala***

***baayactamo asaga iyo cidda uu wakiilka ka yahay toona***"([6]) Waxa uu **xaafid Al-Iiji** kuso raraa ijmaac in umaddu xaq u leedahay in ay xilka xayuubiso ama casisho madaxa u taliya.

Waxa kale oo xusid mudan markii **Al-Imaam Daahir Ibnu Caashuur** markii uu radinayay **Cali Cabdirasaaq** ee uu cadaynayay farqiga u dhexeeya xukunka **Theocratic** ga ah iyo xukunka islaamka waxa uu cadeeyay in xaakimku wakil ka yahay umadda muslimka ah ee uu taliyo ama waxa uu wakil kaga yahay bayco iyo ballan uu la galay am acid iyaga ka wakiil ah ayuu bayco iyo ballan la galay.

## Aragtida is waafajinta caalamaaniyadda iyo diinta

Waxa ay fikradani ku dhisan tahay khalad fahanka lagu dhegay kelmadda **RELIGION** oo kulansanaysa diimo kala duwan oo qaarkood ku kooban yihiin aakhiro xidhiidhna aanay la lahayn adduunka oo dhan sida **Jewish kabbalah** ama diin ku kooban keli ah akhlaaqda iyo dhaqan wanaaga sida **Confucianism** iyo diin adduun iyo aakhiroba kulansatay sida **Islaam** ka oo kale. Waxa khalad ah in isku si loola dhaqmo diimahan kala gedisan iyada oo lagu salaynayo tijaabada reer galbeedka ee dhashay in la shaqo tiro noloshana laga fogeeyo diin oo dhan iyada oo kiristaankii la leexinayo dawrkii ay nolosha ku lahaydna meesha laga saarayo.

Waxa kale oo in badan oo caalamaaniyiinta ka mid ah ay tilmaamaan in dunida reer galbeed ay heshiisiiyeen kiristaankii iyo caalamaaniyaddii taas oo uu beeninayo waaqica iyo xaaladda maanta ka taagan dunida reer galbeed gaar ahaan loollanka ka dhexeeya kiristaanka asalkooda diimeed u dhawran yahay iyo caalamaaniyiin gaar ahaan marka la joogo Waxbarashada, Khaniisnimada, Ilmo-iskatuurka iyo waxyaalaha la midka ah waxaba ay tibaaxayaan daraasada qaarkood in kiristanka maanta jooga aanay lahayn asal muqadas ah ee ay ula yimaadaan bulshada reer galbeedku kiristaannimada hadba sida ayaga cajabisa taas oo kiristaannimadii ka dhigtay mid sinji iyo sawrac midna lahayn.

---

[6] - Ka fiiri Saxiix Al Bukhaari

**Islaamnimo calmaaniyad ah, dhuuxa aragtida**.

Waxa waddo ay jeexdeen in badan oo ka mid ah caalamaaniyiintii carbeed kadib markii ay ku guul daraysteen dagaalkii ka dhanka ahaa diinta waxana ay u mareen labo waddo arrintan:

- **Naash naashka calmaaniyadda.**

Waxa wadadan maray Cabdi Majiid Sharafi isaga oo ku qayaxay calmaaniyada in ay tahay "***In hay adaha dawladda laga saaro waxii xidhiidh la leh qaybo ka mid ah dhaqanka iyo diinta bulshada***" waxa uu qayixitaankan kasoo dheegtay Burger waxase uu kusameeyay dib u habayn isaga oo ku dooday in bilowgii dacwadda Nebigu N.N.K.H ay ahayd calmaani aan sumad diimeed oo shaqada dawladda ku dhex jirtaa aanay jirin.

- **Islaamku waxa uu ku kooban yahay 5 ujeedo.**

Waxa jirta wado labaad oo ku koobaysa diinta oo dhan in ay tahay keli ah shanta ujeeddo ee loo yaqaan maqaasidu ash-shareeca waxana shanta xukun ee shareecadu leedahay ay ku koobtay in ay derejooyin falka aadamaha loo kala sameeyay oo aan baxsanayn wax isaga khuseeya sida xalaal, xaaraam, waajib iwm.

Waxa wadadan qaaday **Xasan Xanafi** waxana muuqata in shareecadu ay tahay uun cinwaan aan waxba ka hoosayn oo ah uun magac aan lahayn sumad iyo jiritaan midna waxaas oo macnayaal ahna waxa uu isugu taxalujiyay waa in uu calmaaniyada boos uga helo diinta ama uu isu waafajiyo islaamnimada iyo calmaaniyada taas oo ka turjumaysa han jab iyo hoosayn fikir oo laxaad leh.

**Islaamku waa farriin ruuxi oo qudha.**

Intani waa doodda uu ku dhisay aragtidiisa **Cali Cabdirisaaq** kitaabkiisa muran dhaliyay ee **"الإسلام وأصول الحكم"([7])** isaga oo todaba qodob ku saleeyay oo ah

1. Islaamku waa farriin ruuxeed aan xidhiidh la lahayn xukun iyo maamul midna.
2. Dhib kuma jiro in la dhaho dedaalkii Nebigu N.N.K.H waxa uu ahaa si uu u gaadho xukunka ee diin m ahayn.
3. Nidaamka xukun ee Nebiga N.N.K.H waa lagu wareerayaa oo ma aha wax cad.
4. Shaqada nebigu N.N.K.H waxa ay ku kooban tahay in dadka diinta gaadhsiiyo wax talis ahna ama xukunna shaqo kuma lahayn.
5. Saxaabadu kuma aanay ijmaacin in ay waajib tahay in umadda xaakim ama imam loo sameeyo.
6. Garsoorku ma aha shaqo sharci ah.
7. Xukunkii khulafada afarta ah iyo dawladihii ka danbeeyay ma ahayn mid diimeed.

Waxa ay culimadu ku buriyeen dooddaas arimahan soo socda:-

- Waxa umadda muslimka ah ay isku waafaqday in la helo Al-Imaamatul cudma waana shay ka mid ah waxyaalaha daruuriga ay tahay ogaalkeedi sida uu faahfaahiyey **Al Imaam- Daahir Ibnu Caashuur**
- Waxa u dhexeeya farqi in dadka qalbigooda lagu rido islaamnimo iyo maamul islaam ah in la dhiso aayadahani waxa ay khuseeyaan in aan Nebiga N.N.K.H lagu kelifin in dadku wada muuminiin noqdaan.

﴿لَّسْتَ عَلَيْهِم بِمُصَيْطِرٍ ﴿٢٢﴾﴾

﴿وَمَا جَعَلْنَاكَ عَلَيْهِمْ حَفِيظًا ۖ وَمَا أَنتَ عَلَيْهِم بِوَكِيلٍ ﴿١٠٧﴾﴾

[7] - Waxa kitaab jawaab u ah qoray Al-Imaam Daahir Ibnu Caashuur.

- ❖ Waxa siirada Suubanaha N.N.K.H ku sugan in uu amarka Heshiis, Dagaal, Garsoor, Maamul, Metelaad dhamaan isagu lahaa oo ay ahayd siyaasadii uu ku hagayay umaddiisa.

Waxa se' xusid mudan in **Cali Cabdirisaaq** uu ka laabtay doodda ah in islaamku yahay farriin ruuxi ah ayna ahayd kelmad shaydaan afka ugu riday isaga hasayeeshee waa dood weli suuqa dilaaliinta calmaaniyada ka caan ah illaa maanta.

**Dawlad madani ah iyo dawlad islaam ah.**

Intaa kadib waxa uu qoraagu saxayaa wadaadaha ay u dhuumatay eray bixnta rayidku **الدولة المدنية** iyaga oo qaarkood ku sifaynaya dawladda islaamiga ah tan madaniga ah taas oo kasoo horjeeda dawladda milatariga ah isaga oo ku tilmaamay in ay tahay fahan la'aanta haysata wadaadaha qaarkood ee ay ka haystaan dawladda madaniga ah waxa uu qoraagu tilmaamayaa in erayga madani ama rayid uu qaamuuska ugu jiro metalayona "***Dawlad aan isku dhex darayn diin iyo siyaasad***" sida uu tilmaamayo Khaliil Cabdul Kariim iyo Cabdul Muncim Al Mash-Shaad iyaga oo ugu taariikhaynaya 1648dii miilaadiga.

**Diintu waa daahir ee siyaasadda haku dhooqaynina.**

Waa weedh ka mid ah weedhaha calmaaniyiintu ay ku afjigaan cidkasta oo u istaagta in la helo siyaasad ka badhax la sixirka calmaaniyada ujeedkuna waxa uu yahay siyaasada iyo maamulka diin kama rabno.

Waxase ay mooggan yihiin in diinta ay kamid tahay siyaasaddu oo kala sooccan diinta iyo siyaasadda la isaga dhigayo laba aan kulmin waa arrin aan qummanayn marka la saaro miisaanka shareecada mana aha wax ay iyagu hadda la yimaadeen ee waxa uga horeeyay gaaladii Makkah markii ay lahaayeen:

قَالَ تَعَالَى: ﴿وَقَالُواْ مَالِ هَٰذَا ٱلرَّسُولِ يَأۡكُلُ ٱلطَّعَامَ وَيَمۡشِي فِي ٱلۡأَسۡوَاقِ لَوۡلَآ أُنزِلَ إِلَيۡهِ مَلَكٞ فَيَكُونَ مَعَهُۥ نَذِيرًا ۝٧﴾ الفرقان: ٧

**"Diin aan ka warcelinayn baahiyaha dadka oo aan siyaasadda lagu hagayo jaangoynayn waa suuxiso iyo khiyaano aan diin lagu tilmaami karin mana aha sifo diinta Islaamku leedahay"**

**Ma jiro kitaab muqadas ahi.**

Waxa fikradaha ay calmaaniyiintu wareejiyaan ka mid ah in laga siibo muqadasnimada nusuusta shareecada iyada oo la raacayo falsafadda ah "Structuralism-Post" ama in aan ahmiyad la siin ujeedka qoraaga ama si kale haddii loo dhigo "Dhimashada Qoraaga" in la qayaxo buugga qoran sida uu ka cairay faylasuufkii **Rollon Bart** taas oo ka dhigan in dhamaan dhaxalkii aqooneed ee islaamku lahaa laga dhigo mid loo fasiro sida hadba qofka akhrinayaa u fahmo oo meesha ka saaraysa raacista qawaacidii iyo xeerarkii dabrayay awooda fahamka aadamaha eek u aaddan nusuusta shareecada Islaanmka.

Waxa fikradani burniaysaa Quraankii Kariimka ahaa waxa uu Allaah yidhi:

﴿كَانَ ٱلنَّاسُ أُمَّةً وَٰحِدَةً فَبَعَثَ ٱللَّهُ ٱلنَّبِيِّـۧنَ مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ وَأَنزَلَ مَعَهُمُ ٱلْكِتَٰبَ بِٱلْحَقِّ لِيَحْكُمَ بَيْنَ ٱلنَّاسِ فِيمَا ٱخْتَلَفُوا۟ فِيهِ ۚ وَمَا ٱخْتَلَفَ فِيهِ إِلَّا ٱلَّذِينَ أُوتُوهُ مِنۢ بَعْدِ مَا جَآءَتْهُمُ ٱلْبَيِّنَٰتُ بَغْيًۢا بَيْنَهُمْ ۖ فَهَدَى ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لِمَا ٱخْتَلَفُوا۟ فِيهِ مِنَ ٱلْحَقِّ بِإِذْنِهِۦ ۗ وَٱللَّهُ يَهْدِى مَن يَشَآءُ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٢١٣﴾﴾ البقرة: ٢١٣

﴿يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُوا۟ ٱلرَّسُولَ وَأُو۟لِى ٱلْأَمْرِ مِنكُمْ ۖ فَإِن تَنَٰزَعْتُمْ فِى شَىْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى ٱللَّهِ وَٱلرَّسُولِ إِن كُنتُمْ تُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ ۚ ذَٰلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ﴿٥٩﴾﴾ النساء: ٥٩

Aragtidan iyo kuwa la midka ah waa wiiqida shareecada iyo in laga dhigo sida kiristaanka mid aan lahayn sumad iyo sawrac midna una samaysan in

qof waliba sida uu doono u fasirto oo aan lahayn xeerar xadaynaya fahamka laga qaadanayo Quraanka Kariimka ah iyo Sunnada Nebiga N.N.K.H.

**Waaqica ayaa sharciga xukuma**

Waxa uu qoraagu kusoo gebogabaynayaa in calmaaniyiinta carabta waxa u hadhay ee ay weli ka laadlaadaan ay tahay in la aadameeyo shareecada kadibna waaqica laga saaro laguna koobo in xukunka islaamiga ah uu yahay mid taariikhda soo maray intaasna ku eekaa iminkana aan u suubanayn in dib loo soo celiyo waxana gadh wadeen ka ah aragtidaa Shuuciga carbeed ee **Nasri Xaamud Abuu Sayid** iyo **Muxammad Arkuun** waana in ahmiyadda naska sharciga ama fikradda loo loodiyo taariikhda ama fikradda loo yaqaan **Hsitoricism Hermeneutical**.

Macnaha shareecada lagu fasirayaa waa taariikhdii ay ku timi taas oo lagaga jawaabi karo in **"Islaamku yahay diin u suuban oo dhaqan galaysa xilli kasta oo meel kasta"**

# Dhammaad

*******